

## **DESMOPRESSIN KU DAWEYN**

Waraaq macluumaa oo ka socoto Akadeemiyada Enures ee Swiidhan,  
[www.svenskaenures.se](http://www.svenskaenures.se)

Habeenki wuxuu caadi ahaan jirka baniaadamku kordhiyaa hormoonka vasopressin-ka, kaasoo keena in kaadidu ay meel iskugu tagto ("xoog") fara badnaanteeduna ay yaraato, si kaadi heysto ay ugu filnaato. Waxay u badantahay in ay tahay qaabka dabiicadu ay ku hubiso in aan helno tiro saacado hurdo ah oo aan arbushaad lahayn habeenkii. Qaar ka mid ah carruurta isku kaadisa ma kordhayo hormoonkaas waqtiga habeenkii ah, kaadidooda habeenkuna waxay markaas ahaaneysaa in qiyas ahaan la mid ah tan maalintii ah, mararka qaarkood xitaa wey ka badantahay. Kaadi heystu wey buuxsameysaa - haddii ay adagtahay in qofka hurdada laga kiciyana - inta la hurdayo ayey is faarujineysaa.

Ka xoojin ahaan hormoonka jirku uu leeyahay waxaa la soo saaray maaddo aad ugu eg, desmopressin (Minirin®, Nocutil®), oo badanaa carrabka hoostiisa la gashto iyadoo kaniini afka ku dhalaalaya ah. Desmopressin waxaa leysku siyyaa qiyaso ah 1-2 kaniini oo 120 mikro garaam ah oo habeenki la qaadanayo. Wuxuu qofku ku billaabi karyaa 2 kaniini, haddii ay shaqeyso wuxuu tijaabin karyaa in uu 1 hoos ugu dhacyo, ama wuxuu markaa qofku ku billaabi karyaa 1 kaniini, wuxuuna u kordhin karyaa ilaa 2 haddii saameyntiisu aysan wax ku filneyn. Qaab san ku buufin ah oo desmopressin-ka ah, oo horay loo isticmaali jiray, isku kaadis ku daweyn ahaan laguma talinayo imminka.

Sanadka ugu habboon ee desmopressin-ka lagu billaabo waa agagaarka 6 sano jirnimada. Dawada waxaa leysi siyyaa fiidkii, ku dhawaad hal saac ka hor inta uusan qofku sariirta aadin, wuxuuna shaqeynayaa ku dhawaad 8 saacadood. Waqtigaas waxaa dad kala duduwan loogu celiyaa kaadi samays heerar kala duwan leh, maalinta xigtana xaaladdu sidii hore ayey u noqoneysaa, iyadoo ku xiran inta cabitaan ee uu qofku qaato. Si looga fogaado in dheecaanku jirka isugu ururo waa in cabidda leyska joojiyo laga billaabo hal saac ka hor iyo 8 saac ka bacdi marka dawada la qaato. Kaadi heysta waxaa la faarujinayaa waqtiga ugu dambeysa ee suurta gal inta aan la hurdin. Waa muhiim in kaniiniga qabowga lagu qallajiyay uu si dhab ah ugu dhalaalo carrabka hoostiisa; biyo afka lalama raacinayo iyadoo la liqayo. Waxaa habboon in la raaco tilmaamaha ku aaddan sida khariiddadda kaniiniga loo furayo iyadoo la akhrinayo warqadda baakadka ku jirta.

Badanaa habeennada ugu horreeya ayaa horbaba la dareemaya haddii uu qofku ka mid yahay ku dhawaad 60-70 % carruurta ku fiicnaaneysa ama gebi ahaanba kaadidu uga go'ayso desmopressin-ka. Haddii uu saameyn fiican yeesho waxaa la sii wadayaa 3 bilood, markaas ka dibna waa la joojinayaa, ilaa uu canuggu mar kale isaga sii kaadiyo. Markaas waxaa la billaabayaa waqtii daweyn oo cusub oo seddax bilood ah. Sidaas ayaa haddii loo baahdo sanooyin badan lagu wadi karaa, ilaa uu bukaanku si lagu kalsoonaan karo isku kaadinta uga go'o. Haddii wax saameyn ah aan muddo laba usbuuc ah la dareemin (baakadda inta ugu yar/tijaabada inta ugu yar oo ah 30 kaniini), waa in qaabka wax daweynta la eegaa oo laga yaabee loo beddelaa wax kale, tusaale ahaan gambaleel (eeg warqad gaarkeeda ah!).

Mararka qaarkood waxay waaliddiintu doortaan in ay carruurtooda desmopressin ku daweeyaan oo keliya "habeenno muhiim" oo go'an, taasoo la xiriirta habeen ku dhixitaan, kaambing iyo wixii la mid ah, gaar ahaan haddii isku kaadistu ay tahay mid mar-mar dhacda. Sidoo kale waa mid gebi ahaanba u nidaamsan sida ay tahay. Markaas waxaa muhiim ah in qof kale oo weyn oo mas'uul canugga ka ah lagu wargeliyo ka taxaddiridda wax cabidda galbihii ah.

Haddii desmopressin loo isticmaalo si tilmaanta waafaqsan, lana raaco taloooyinka xagga dareeraha ku aaddan, waa dawo aan wax khatar ah lahayn, oo ay dhif tahay in ay dhib-dhinaceed yeelato. Dhib-dhinaceedyada nuucan ah waxay noqon karaan madax xanuun, cuncun, calwasaad, lallabbo ama calool xanuun, waaneyn joogsanayaan marka dawada la joojiyo. Haddii dhib-dhinaceed laga shakisanyahay waxaa mar walba habboon in dhakhtarka mas'uulka ah la tala weydiyo, siiba haddii isla mar ahaantaas uu qofku qaadanayo dawo kale.

Akadeemiyada Enures ee Swiidhishka iyadoo la marayo Tryggve Nevéus, Sven Mattsson iyo Annika Lindgren